# Saamixida Khidmadaha Laanta Socdaalka

Immigration Fee Waivers

## Waa maxay Saamixida khidmadu?

Kolka aad u dirsato codsi laanta socdaalka (immigration), badanaa waxaa jira kharash ama khidmad ay tahay inaad ku bixiso xareysiga codsiga. Marmarka qaarkood, waxa aad codsan kartaa "khidmad ka saamixid." Hadii laanta socdaalku ay ansaxiso codsigaaga ka saamixida khidmada, khasab kugu ma aha inaad bixiso khidmada.



## Ciddee ayaa heli karta ka saamixida khidmada?

Si aad u hesho khidmad ka saamixida, waa inaad codsataa adigoo buuxinaya Foomka I-912, (Form I-912), Codsiga Khidmad Saamixida. Laakiin, waa inaad tusto laanta socdaalka inaadan bixin karin khidmada xareysiga. Waxa aad u baahan tahay inaad cadeyso ugu yaraan 1 ka mid ah sedexdaan waxyaabood:

1. Hadii aad hesho manfacyada dowlada sida kiro caawinta, cunto, MFIP, SSI, ama MA.
   ama
2. Dakhligaagu uu hooseeyo
   ama
3. Ay ku haysato dar-xummo dhaqaale, sida kharashaad badan ama shaqo ama guri la'aan aad noqotay

**Ogow:** Waad aad sheegan kartaa hal mid ka badan oo sababahaa ah hadii aad cadeyn kartid.

## Sidee ayaan ku cadeyn karaa inaad u baahnahay saamixida khidmada?

Kuwani waa qaabab aad ku cadayn karto inaad u baahan tahay khidmad saamixid:

- Hadii aad qorato inaad hesho manfacyo dowladeed, ka soo dir nuqul warqada degmada ama Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security Administration) ee sheegaysa inaad hesho manfacyo. Warqaddu waa inay cadeysaa inaad iminka hesho manfacyo, kolkaa ka eeg inay ku qoran yihiin waxyaabaha sida waqtiga manfaca la ogolaaday, waqtiga uu dhmaanayo iyo/ama waqtiga la cusboonaysiinayo. Ha isticmaalin daabacida ay baaqyada uuni ku qoran yihiin ee hay'ada USCIS ku aysan fahmi karin.

- Hadii aad qorato in dakhligaagu hooseeyo, ka soo dir nuqul warqadaha canshuurtii ugu dambeeysay ee aad xareysay iyo nuqulo jeegtaada dabadooda oo ah kuwii 90-cisho ee la soo dhaafay.

- Hadii aad qorato in dar-xuumo dhaqaale ay ku haysato, soo dir cadeyn. Tusaale ahaan, nuqulada biilalka waaweyn ee lagaa rabo, warqad qolada shaqadaada oo oranaysa in shaqadii kaa dhamaatay, cadeyn ah in gurigaaga lagaa saarayo. Sidoo kale ka soo dir nuqulada dhamaan biilalkaaga aad bil walba bixiso.

## Ma u codsan karaa khidmad ka saamixid wax codsi ah?

Maya, uma aad isticmaali kartid saamixida khidmada dhamaan codsiyada laanta socdaalka.

Waxa aad u isticmaali kartaa codsiyada sida:

- **Form I-90** Codsiga lagu bedelayo Kaarka Degnaanshaha Rasmiga ah
- **Form I-765** Codsiga Warqada Ruqsada Shaqada (marka laga reebo DACA)
- **Form I-751** Arjiga ka Qaadida Shuruudaha Sharciga Deganaanta
- **Form I-821** Codsiga Magangelyada Ku Meel Gaarka ah (TPS)
- **Form N-400** Codsiga Dhalashada (Muwaadinimada)
- **Form N-600** Codsiga Shahaadadda Muwaadinimada
- **Form N-336** Codsiga dacwo dhagaysiga oo ku saabsan Go'aanka ka soo baxay Nidaamka Dhalasho Qaadashada sida ku qoran Qaybta 336 ee sharciga (tani waa racfaanka laga qaado diidmada muwaadinimada)
- **Form I-485** Codsiga Isu-diiwaan gelinta Daganaansho rasmi ah ama wax looga Bedelayo Sharcigaaga. Kani waa codsiga kaarkaaga deganaanshaha (green card). Waxa aad u heli kartaa khidmad saamixid qaar ka mid ah kiisaska, laakiin aan ahayn dhamaan. Qaar ka mid tusaalayaasha kolka aad heli kartid saamixid waa: Hadii aad tahay magangelyo codsade, dhibane lagu tacadiyey, haste fiisaha U (U visa) ama fiisaha T (T visa), aad leedahay Sharci gaar ah oo quseeya Kurayda muhaajiriinta ah ama aad codsanayso sharci adigoo cuskanaya waxa la yiraa (VAWA).
- **Form I-290B** Ogaysiiska Racfaan Qaadashada ama Dacwo. Marmarka qaarkood waxa aad u heli kartaa khidmad ka saamixid foomkan.



Wixii faahfaahin codsiyada aad u heli karo khidmad saamixida gal: https://www.uscis.gov/sites/default/files/document/forms/i-912instr.pdf.

## Sidee ayaan u codsadaa khidmad saamixid?

Si aad u codsato khidmad saamixid, **buuxi [Foomka I-912](https://www.uscis.gov/sites/default/files/document/forms/i-912instr.pdf).** Ama Gal https://www.uscis.gov/sites/default/files/document/forms/i-912instr.pdf.

Waxaad kale oo aad ka heli kartaa foomamka hay'ada USCIS hadii aad wacdo Khadka Codsiga Foomamka ee lacag la'aanta ah ee ah 1-800-870-3676.

- Ka buuxi Foomka I-912 khadka (online) ka ama daabaco AMA
- Ugu buuxi Foomka I-912 ee la daabacay si TAXADAR LEH gacanta iyo khad madow

**Boostada soo Dhig Foomka I-912.** Ku lifaaq cadeyn ah sababta aad ugu baahan tahay khidmad ka saamixida codsigaaga la soo buuxiyey (I-90, N-400 iwm). **Ha soo kala dirin labadooda!** Ugu soo dir codsigaaga, codsigaga ka saamixida khidmada iyo cadeyntaada ciwaanka lagu bixiyey "Meesha laga xareysto" ee tilmaamaha codsigaaga laanta socdaalka ama foomka arjiga.

**Hadii laanta socdaalku ay ansaxiso codsiga saamixida khidmada ah, waxaa laguu soo diri doonaa rasiid ogaysiis ah oo ay ku qoran tahay cadadka lacagta xareysiga oo ah $0.** Ogaysiiskan waxaa kaloo dhici karta inuu yiraa "khidmad saamixida waa la ansaxiyey."

## Maxaa dhici hadii ay yiraahdaan ma aan heli karo khidmad ka saamixid?

Hadii laanta socdaalku ay diido khidmad saamixida, waxa ay kuu soo diri ogaysiis ku waydiinaya inaad keento cadeymo kale oo ku saabsan sababta aadan u bixin karin khidmada. Codsigaaga iyo wixii kale ee warqado ah ee aad dirtay dib ayey kuu soo diri. Kolkaa waxa aad haysataa 2 waxyaabood oo aad kala dooran karto:



1) Waxa aad dib ugu diri kartaa codsiga saamixida oo ay weheliyaan akhbaarta ay codsadeen, iyo codsiga iyo warqadaha kale, ama
2) Waxa aad soo diri kartaa codsigaaga uun waana aad iska bixin khidmada.

## DIGNIIN!

Aad iyo aad u taxadar ka hor intaa aadan u gudbin codsi laanta socdaalka. Marmarka qaarkood, hadii codsigaaga la diido, waxaa lagu gelin karaa hanaanka dadka la masaafurinayo. Hadii aad horey u gaysatay dambiyada qaarkood, aad been u sheegtay dowlada waxaa lagu gelin karaa hanaanka dadka la masaafurinayo. XASUUSNOW:
Laanta socdaalku waxa ay eegi kartaa DHAMAAN taariikhda oo dhan.

**Ka hel talo qareen qaabilsan sharciyada laanta socdaalka. Qareenku waxa uu ka caawin karaa inuu hubiyo in wax walbaa hagaagsan yihiin!**

## Buuxinta Foomka I-912 ee Saamixida Khidmada

## Akhbaarta Guud

Hadii waxa foomka ku qorani aysan adiga ku quseeyn ku qor "N/A" (Ma quseeyso) hadii aan tilmaamahu aysan kuu sheegin wax kale oo taa ka duwan. Hadii jawaabtu ay tahay waxba, ku qor “Waxba” ("None.")



Hadii aad ugu baahato meel badan si aad jawaab ugu qorto, isticmaal qaybta “akhbaarta dheeraadka ah” ee bogga ugu dambeeeya foomka ama warqad ka gooni ah foomka. Warqada korkeeda kore ku qor magacaaga iyo Lambarka Diiwaangelinta Dadka Qalaad (A-Number), hadii aad leedahay. Sidoo kale qor labadaba lambarka qaybta iyo kan shayga aad ka jawaabayso.

## Qaybta 1 – Sababta Codsigaaga (Sababta aad ugu baahan tahay saamixida)

Calaamadi xulashada muujinaysa sababta aad u codsanayso khidmad saamixida. Waxa aad u baahan tahay inaad doorato mid uun, laakiin hadii in ka badan hal nooc ay adiga ku quseeyaan, waa aad dooran kartaa hal ka badan. Hadii aad doorato hal ka badan, waa khasab inaad bixiso dukumiintiyo mid walba gaar uga hadlaya.

**Dooro 1** hadii aad hesho manfacyo dowladeed (ee la yiraa “manfacyda danta ku xiran” sida MFIP, SSI, MA iwm.) hadii xilahaaga, qof aad wada joogtaan, waalid, ama qaraabo aad la nooshahay ay hesho manfacyada, adiguna sidoo kale waa aad dooran kartaa tan. Xaq uguma lehid sababtan hadii ilmahaaga kaliya ahi ay manfacyada dowlada helaan. Waa inaad soo dirtaa dukumiintiyo cadeynaya inaad adiga (qaraabadaadu) aad heshaan manfacyo. Qoraal dhawaan ka soo baxay degmada ama Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security Administration) oo cadeynaya manfaca iyo cadadka adiga (ama iyagu) aad heshaan bil walba waa cadeyn wanaagsan.

**Dooro 2** hadii aadan helin manfac dowladeed laakiin dakhiga qoyskaagu uu yar yahay ama ka hooseeyo 150% Habraaca Saboolnimada ee Dowlada Dhexe. Waa inaad soo dirtaa jeeg dabadood iyo canshuur celintii ugu dambeeysay ee aad xareysay si aad u cadeyso taa. Si aad u ogaato akhbaar ku saabsan Habraaca Saboolnimada ee Dowlada Dhexe gal: http://uscis.gov/I-912P. Riix ka dibna linkiga yiraa I-912P. Riix falaarta hoos u jeeda si aad u xulato gobolkaaga. Ogow: dhamaan gobolada oo dhan marka laga reebo Alaska iyo Hawaii waxa ay soo hoos galaan midka koowaad.

**Dooro 3** Hadii sababaha kale aysan adiga ku quseeyn laakiin ay ku haysato dar-xummo dhaqaale iyadoo sababtu waxyaabaha sida kharashaad caafimaad, shaqo la’aan guri ka saarid ama hoy la’aan. Waa inaad soo dirtaa dukumiintiyo cadeeya arrimahaa. Tusaale ahaan, nuqulada kharashaadka caafimaad ee lagugu leeyahay, warqad qolada shaqadaada oo oranaysa in shaqadii kaa dhamaatay, cadeyn ah in guriga lagaa saarayo.

## Qaybta 2 – Akhbaarta Adiga kugu saabsan

Buuxi akhbaarta adiga kugu saabsan, hadii aad tahay qofka u baahan ka saamixid khidmada. Hadii aad leedahay cid aad mas'uul ka tahay oo iyana qayb ka ah codsiga, ku bixi akhbaartaa Qaybta 3.

Hadii aad leedahay 2 magac oo dambe, ku qor labada magac ee dambe santuukha Magaca Qoyska.

Su'aasha 7 aad ee ku saabsan xaalada guurka, guurarka diinta ama dhaqanka uun la isku guursado ee dowlada wadanka aad u dhalatay aysan aqoonsanayn ma xisaabsana.

## Qaybta 3 – Codsiyada iyo Arjiyada aad u Codsanayso khidmad ka Saamixida

hadii aad u codsanayso khimad saamixid hal codsiga oo adiga naftaada kaliya ah, kaliya ku buuxi hal layn oo santuukha ah kaliya akhbaartaada. Hadii aad u codsanayso ilmahaaga ama xilahaaga isla markaa aad codsanayso aadna doonayso in sidoo kale iyana laga saamaxo khidmadaha codsiyadooda, u buuxi hal layn oo santuukha ah qof walba ee codsi leh. Hadii xubnaha qoyskaagu aysan codsanayn isla markaa aad adigu codsanayso, uma baahnid inaad halkan ku qorto.



Tusaale ahaan, hadii adiga iyo ilmahaagu aad labadiinuba codsanaysaan inaad noqotaan daganaanayaal rasmi ah isku mar, kolkaa waxa aad ku buuxin hal layn oo santuukhan ah akhbaartaada, hal layn oo kale oo santuukhan ahna waxa aad ku buuxin akhbaarta ilmaha. "Tirada guud ee foomamka" ee salka santuukhu waa inay is waafaqaan tirada codsiyada ah ee aad u dirayso laanta socdaalka hadii aad rabto in laga saamaxo khidmadaha dhamaan codsiyada oo dhan.

## Qaybta 4 – Manfacyada Baahida ku Xiran

Hadii aad calaamadisay "1" qaybta 1, ee lagu codsanayo khidma ka saamixid sababta oo ah helida manfacyada dowlada (ee la yiraa "manfacyada baahida ku xiran" sida MFIP, SSI, MA iwm.) kolkaa waxa aad u baahan tahay inaad buuxsio qaybtan. **Hadii aadan calaamadin lambar "1" Qaybta 1, ka BOOD qaybtan.**

U buuxi hal layn oo shaxanka ah qof walba oo hela manfac. Kolka la buuxiyo, waxa dhici karta inay u ekaato sidan:

| | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Ami Ahmed | Kali | Degmada Hennepin | MA | 03/28/2013 | 01/01/2017 |

Eeg warqadaha aad haysato ee aad ka heshay hay'ada ku siisa manfaca si aad u hesho akhbaartan. Waxaa dhici karta inaad u baahato inaad waydiiso hawl-wadeenkaaga akhbaarta ama warqad ay ku qoran yihiin manfacyada aad heshaa.

Waa inaad soo dirtaa qoraalada cadeynaya manfacyada aad hesho iyo inta ay yihiin. Qoraal dhawaan ka soo baxay degmada ama Maamulka Sooshal Sakuuratiga (Social Security Administration) oo cadeynaya nooca iyo cadadka manfaca aad hesho waa cadeyn wanaagsan.

Hadii aad u codsanayso saamixida khidmada sabab ah inaad qaadato manfacyo uun, kolkaa waxa aad u boodi kartaa Qaybta 7.


## Qaybta 5 – Dakhliga ah ama ka Hooseeya 150 Boqolkiiba Habraacyada Aqoonsiga Saboolnimada ee Dowlada Dhexe

Hadii aad calaamadisay “2” Qaybta 1, oo aad ku codsanayso saamixida khidmada sababta oo ah in dakhligaagu yar yahay kolkaa waxa aad u baahan tahay inaad buuxiso qaybtan. **Hadii aadan calaamadin lambar “2” Qaybta 1, ka BOOD qaybtan.**

Su’aalahaasi waxa ay ku waydiiyaan sida u kasbato lacag iyo cidda kula nool.

Su’aasha 2, “Manfacyada shaqaalaha shaqo la’aanta ah” macnahoodu waa jeeg ka yimaada Gobolka oo aad hesho. Manfaca shaqo la’aanta ah, sidoo kale badanaa waxaa lagaa rabaa inaad tagto meel shaqooyinka laga raajiciyo aadna la kulanto la taliye. Hadii aadan shaqo hayn laakiin aadan ka helayn wax lacag ah ama kulan ah hla taliyaha, kolkaa dooro “maya”.

Shaxanka lambarka 4, u buuxi hal layn oo shaxankan ah qof walba oo qoyskaaga ka mid ah. Waa inaad ku dartaa: naftaada, xilahaaga (hadii ay kula nooshahay ama uu kula nool yahay), ilmaha kula nool, waalidkaa, hadii ay adiga gurigaaga kugula nool yihiin, iyo cidii kale ee aad mas’uul ka tahay ee aad canshuurta celinta ku xareysato. Hadii ilmahaagu ay guursadeen ama ay ka weyn yihiin 24 sanno, xisaabta kuma jiraan mana aha inaad halkan ku qorto. Eeg tilmaaha foomka ama la tasho qareen hadii aadan hubin cidda lagu darayo qaybtan.



Hadii ay jiraan dad kale oo qoyskaaga ka mid ah oo wax ka bixiya lacagta kirada iyo waxyaabo kale, waa aad ku dari kartaa cadadkaa su’aasha 7. Calaamadi santuukha ku xiga “Gargaarka Dhaqaale ee Ilmaha Roon-roon, Cidda Mas’uulka laga yahay, Dadka kale ee la Nool Qoyska” ka dibna ku qor cadadka ay ku siiyaan santuukha.

Waa inaad soo u dirto jeeg dabadood iyo canshuur-celintaadii dhawaan ahayd ee cadaynaya dakhligaaga. Hadii ay jiraan wax isbedelo ah oo xaaladadaada ku yimi intii aad canshuurta xaraysay, u sheeg. Isbedelada waxaa ku jiri kara: inaad shaqadii aad wayday, aad heshay shaqo cusub, laakiin aad ka qaadato lacag ka yar tan tii shaqadii hore, ilmo kale ay kuu dhasheen, furiin, guur, aad heshay shaqo lacag badan leh. Ku qor waxa dhacay meesha banaan ee su’aasha 9.

Eeg inaad xaq u leedahay khidmad saamixida kolka aad isku wada darto dakhligaaga. Si aad uga eegto Habraaca Aqoonsiga Saboolnimada ee Dowlada Dhexe, gal shabakada: [http://uscis.gov/I-912P](http://uscis.gov/I-912P). Riix linkiga yiraa I-912P. Eeg dakhliga tirada dadka ee qoyskaaga ka dibna barbar dhig lambarka. Hadii lambarkaagu uu ka sareeyo, kolkaa waxaa dhici karta inaadan helin saamixida khidmada. Waxaa dhici karta inaad u baahato inaad ku darto akhbaar ku saabsan dar-xumo dhaqaale oo ku haysata, aadna calaamadisid“3” ee Qaybta 1.

Hadii aad u codsanayso saamixida khidmada sabab ah dakhli hooseyn uun, kolkaa waxa aad u boodi kartaa Qaybta 7.

## Qaybta 6 – Dar-xummo Dhaqaale



Hadii aad calaamadisay “3” ee Qaybta 1, oo aad ku codsanayso saamixida khidmada sababta oo ah in dakhligaagu yar yahay kolkaa waxa aad u baahan tahay inaad buuxiso qaybtan. **Hadii aadan calaamadin lambar “3” Qaybta 1, ka BOOD qaybtan.**

Qor waxa jira oo ka dhigaya wax adag inaad lacag u hesho waxyaabaha sida khidmada codsiga. Qor sida dar-xummada dhaqaale ay lacagi kaaga baxday iyo waxa bixida lacagtaasi ay tahay. Tusaale waxaa noqon kara hadii qoyska arrin caafimaad ku soo korortay ayna galeen kharash caafimaad oo weyn oo laga rabo in ay bixiyaan. Ama hadii qof madaxda kuu ah ee shaqadu uu saacadahaagii shaqada jaray ama hadii aad shaqadii ay kaa dhamaatay. Hadii aad u baahan tahay meel kale oo banaan oo aad wax ku qorto, isticmaal meesha banaan ee bogga 11.

Su’aasha 3, geli santuukha wadarta kharashkaaga bisha. Calaamadi santuukha mid walba oo ah waxyaabaha aad bixiso bil walba oo lagu daray cadadka wdarta ah. Waa inaad soo dirtaa dukumiintiyo cadeynaha waxyaabahaa. Ku dar nuqulada heshiiska liiskaaga ee sheegaya kiradaada, iyo kharashaadkaaga kale ee sheegaya inta aad bixiso, nuqulada kharashaadka waaweyn, warqad qolada shaqadaada oo oranaysa in shaqadii kaa dhamaatay, cadeyn ah in gurigaaga lagaa saarayo.

Xulashadan waxaa caadiyan gaar loogu fidiyaa dadka leh dakhliga heerka 150% ka badan, laakiin dhawaan ay la soo darseen dar-xumooyin dhaqaale. Hadii aad midkan xulato, waa muhiim inaad cadeyso inaadan kaafiyi karin baahidaada lacageed ee bil walba iyadoo sababtu tahay dar-xummo dhaqaale awgeed.

## Qaybta 7 – Oraahda Codsadaha

Qaybtan, “Codsadaha” adigaa laga wadaa. Hadii turjubaan uu kaa caawiyey inaad fahamto foomkan, kolkaa waxa aad u baahan tahay inaad calaamadiso santuukha “B” ee su’aasha 1. Turjubaanku sidoo kale waxa uu u baahan yahay inuu buuxiyo Qaybta 9.

Hadii qof kale uu adiga foomka kuu buuxiyey, ku qor magaciisa qofkaa su’aasha 2 waxa ayna u baahan yihiin iyana inay buuxiyaan Qaybta 10.

Ka dib kolka aad akhrido sii deynta, saxiix taariikhdana ku qor Foomka 1-912 (Form 1-912). Kolka aad saxiixayso waxa aad balan qaadaysaa in akhbaarta codsiga iyo dukumiintiyada kaleba ay run yihiin. Saxiixaagu sidoo kale waxa uu siiyaa hay’ada USCIS ogolaansho ay uga heli karto akhbaarta adiga kugu saabsan hay’ada kale hadii ay ugu baahdaan inay ka caawiso go’aansiga inaad xaq u leedahay saamixida iyo in kale. Kuwaa waxaa ku jira nuqulada warqadaha canshuur-celintaada dowlada dhexe.

Qof kasta oo codsanaya khidmad ka saamixid waa khasab inuu saxiixo taariikhdana ku qoro Foomka 1-912 (Form 1-912).

- Hadii ilmo 14-sanno jir uu yahay ama uu ka weyn yahay, waa khasab inuu saxiixo taariikhdana ku qoro foomka.

- Hadii ilmo uu 14-sanno jir ka yar yahay, waalidka ama mas'uulka sharciga ah ayaa u saxiixi kara taariikhdana ugu qori kara ilmaha. Si taa loo sameeyo, saxiix foomka ka dibna ku qor waxa aad isu tihiin ilmaha meel u dhow meesha magacaagu ku yaal.

- Hadii qofku uusan dhamaysan karin hawsha warqadaha naafanimo awwgeed, mas'uulka sharciyeysan ayaa u saxiixi kara taariikhdana ku qori kara foomka. Ku soo dar dukumiintiyo maxkamadeed oo cadeynaya mas'uulnimada.

## Qaybta 8 – Oraahda Xubinta Qoyska ka tirsan

Hadii xubin qoyska ka mid ahi ay isticmaashay turjubaan kale, ama ay ku hadasho afka duwan adiga kaaga, waxa ay u baahan yihiin inay buuxiyaan Qaybta 8. Tusaale waxaa noqon kara hadii aad ku hadasho aadna akhrido afka Ingiriiska, laakiin qofka aad isqabtaani uusan ku hadlin afkaa. Kolkaa qofka aad isqabtaan waxa uu u baahan yahay inuu qoro turjubaankiisa uuna buuxiyo Qaybta 8. Turjubaanka isna waxa uu u baahan yahay inuu buuxiyo Qaybta 9.

## Qaybta 9 – Akhbaarta Turjubaanka

Hadii uu turjubaan caawiyey adiga ama qof xubin ka ah qoyskaaga turjubaanku waxa uu u baahan yahay inuu buuxiyo uuna saxiixo Qaybta 9. Hadii aadan isticmaalin turjubaan ku caawiya, uma baahnid inaad buuxiso qaybtan.

## Qaybta 10 – Akhbaarta Diyaariyaha



Diyaariyahu waa cid walba oo aan adiga ahayn ee buuxisa foomkan. Waxaa ku jira qareeno, laakiin, waxa uu noqon karaa saaxiib, ehel, hawl-wadeen degmo ama cidii kale ee adiga akhbaarta kuugu qortay foomka. Hadii cid kale ay kaa caawisay buuxinta foomka, waxa ay u baahan yihiin inay buuxiyaan qaybtan. Hadii adigu aad wax walba qoratay, uma baahnid inaad buuxiso qaybtan.

**Boostada soo dhig Foomka I-912 (Form I-912) iyada oo ay weheliso cadeyn ah sababta aad ugu baahan tahay saamixida khidmada codsigaaga. Ha soo kala dirin! Ku soo hagaaji ciwaanka lagugu siiyey tilmaamaha "Meesha laga Xareysto" ee codsigaaga laanta socdaalka ama foomka arjiga ah.**

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2023 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**